WARSIDE
ERGADA CAALAMIGA AH EE LAANQAYRTA CASE E SOOMAALIYA
DAABACAAD NO.4 MARCH 2015

GARGAAR

HAWLAHA KA SOCDA XABSIYADA SOOMAALIYA

Booqashooyinka shaqsiyaadka xorriyadooda laga qaaday waa udub dhexaadka iyo qeybta taariikhiga ah ee hawsha Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas (ICRCda) ay ka qabato daafaha kala duwan ee caalamka. Maxaabiista dagaalka ee ugu horeyay ay ICRCda booqatay waxay ahayeen kuwii ku sugnaa Galbeedka Roomaaniya iyo Serbiyiinta oo la xiray xilligii Dagaalkii Koowaad ee Dunida 1914-1918- Tan iyo waagaas, ICRCda waxay booqatay kumanaan maxaabiis oo dagaal ah xilligii Dagaalada Caalamka iyo weliba maxaabiis siyaasadeed sida Nelson Mandela intii uu xirnaa. Had iyo jeer hawshan waxay aheyd ubucda hawlgalka ICRCda waana mid ka mid ah waxyaalaha muhimka ah oo jawaabaha kala duwan ee muhiimka ah ee aan ka bixinno colaadaha iyo xaaladaha deg degga ah ee aadminimo.

ICRCda waxay wax ka qabataa Soomaaliya muddo 38 sano. Waqtigaas gudihiisa, gaar ahaan intii u dhexeysay sanadihii 1977kii iyo 1988kii, waxaay booqan jirtay maxaabiistii la xiray xilligii colaaddii Ogaadeeniya. Dhowaan tan iyo 2012kii ICRCda waxay booqataa dadka ku xiran xabsiyada, saldhigyada boliiska iyo kuwo hoostaga hay'adaha ammaanka ee dawladda. Tani ka sokow jawaab baan ka sii bixinnaa colaada daba dheeraaday iyo masiibooyin dabiici ah oo soo noqnoqda oo Soomaaliya ku raagay. Jawaabaha la bixiyey waxay ka mid yihiin gaargar deg deg ah, taageero riqsi ah iyo weliba mashaariicda caafimaadka.

Joogitaanka xabsiga ayaa dhibaatooyin badan u abuura lahaystayaasha, qoysaskooda iyo madaxda mas'uulka ka ah goobaha dadka lagu hayo. ICRCda waxay ka shaqeysaa si ay u daboosho baahida gaarka ah ee dadkaasi oo idil ay leeyihiin. Lahaystayaasha waa in loola dhaqmo si aadminimo oo sharaf ah tan iyo inta ay xabsiyada ku jiraan, qoysaskana waa in goor walba ay la socdaan xaaladda dadkooda ee xabsiga ku jira waana in ay helaan fursad ay kula xiriiraan ayna ku booqdaan kuwa xiran.

Mas'uuliyiinta xabsiyada waxay xambaarsanyihiin mas'uuliyad adag taas oo u baahan dhaqaale farabadan iyo xirfado gaar ah. Markii goldaloolo ama welwel dhacaan, si qarsoodi ah baan arrintan ugala wadahadalnaa dadka mas'uulka ka ah waxyabaha kala duwan, waana aalad lagu wacyi geliyo mas'uuliyiinta si ay hore ugu maraan. Horumarkaasi inta badan kuma yimaado dhaqsihii ay jeclaan lahayeen dhinacyada daneysan, laakiin waaya aragnimadeena waxay tusaysaa in wadahadal joogto oo daacad ah uu yahay habka ugu wanaagsan oo lagu gaari karo isbeddel fiican oo raaga.

Patrick Vial
Madaxa Ergada ICRCda ee Soomaaliya

ICRC
Guddiga Caalamiga
ee Laanqeyrta Cas

ILAALINTA XUQUUQDA IYO DARYEELKA MAXAABIISTA

Axmed Zaroug, waa mas'uulka ICRCda Soomaaliya u qaabilsan dhammaan hawlaha ICRCda ay ka qabato xabsiyada Soomaaliya ayaa sharaxaya booqashooyinka ICRCda ku bixiso goobaha dadka lagu hayo.

S: Maxay ICRCdu u booqataa dadka xabsiyada ku xiran?

J: Waqtigan la joogo, ICRCdu waxay booqataa nus malyan lahaystayaal ah oo ku sugan in ka badan 90 waddan ama dhul aan waddan ahayn ee adduunka oo dhan (Sida Afkhanistaan, Yaman, Ciraaq, Kolombiya, Filibiinis, Guwantanaamo, Kashmiir iyo kuwo kale). Ujeeddada hawshan ee aadminimada ah waa in la xaqiijiyo in shakhsiyaadka laga qaaday xorriyadooda loola macaamilo si sharaf iyo aadminimo ah. Waxaan kaloo lahaystayaasha ku caawinnaa si aysaan u lumin xiriirka ay la leeyihiin qoysaskooda iyo qaraabadooda.

In kastoo annaga aan su'aal ka qabin sabaabaha qof xabsi loogu hayo, waxaan xoogga saarnaa in ay muhiim tahay in si buuxda loo xushmeyo ballanqaad garsoor ah sida maxkamad cadaalad ah iyo hannaan caqli gal ah oo dib u dhigga xukunka. Arrimahaan saameyn weyn ayey ku yeelan karaan buuxdhaafka maxaabiista tasoo haddana si xog leh u saameysa ku dhowaad dhamman qaybaha ee ka mid ah xaaladda guud lahaystayaasha ay ku sugan yihiin.

Waa in hoosta laga xariiqa in mas'uuliyiinta dadka ku haya xabsiga ay keligood ka saaran tahay mas'uuliyadda ladhaqanka maxaabiista si ay ahaato mid aadminimo ah iyadoo xaaladdooda guud ay fiicantahay. Qeyb ka mid ah sabaabaha ICRCda ay ku booqato lahaystayaasha waa in ay si toos ah talooyinkeeda ugu gudbiso mas'uuliyiinta taasoo ku caawin lahayd in ay fulin karaan mas'uuliyaddan ee muhiimsan.

S: Booqashooyinkan sidee bay u hawlgalaan?

J: Nidaamka ICRCda booqashooyinkeeda ay ku isticmaasho waa isku mid caalamkoo idil. Kooxaha koormera goobaha dadka lagu hayo waxay ugu horeynta la kulmaan taliyaha xabsiga si ay uga wada hadlaan ujeeddada booqashada iyo aragtida dhanka mas'uuliyiinta ee khuseysa xaaladda ka taagan xabsiga waqtiga la joogo.

Sarkaal ICRC oo si shaqsi ah ula hadlaaya maxbuus

Waxaa laga wadahadla arrimaha maamulka sida tirada lahaystayaasha, waxaana kale la soo raacaa arrimo kala duwan oo mas'uuliyiintu ay rabaan in ay u soo jeediyaan taxaddarka ICRCda.

Kulankaani ka dib waxaa la koormeeraa qolalka maxaabiista iyo xitaa meelo kale sida jikada iyo isbitaalka haddiise uu jiro. Koormeerkan ka dib waxaa la sameyaa daraasaad qoto dheer ee qolalka maxaabiista, iyo kulamo si asturan loola yeesho maxaabiista ama koox ahaan ama keli keli ahaan.

Wadahadallo noocan ah ee asturan ayaa maxaabiista awood siiyaan in ay si xor leh uga hadlaan xaaladdooda taasoo ergada ICRCda ku caawisaa in ay si habboon u fahmaan oona qiimeeyaan maxaabiista xaaladahooda iyo la macaamilkooda. Macaalumadka ICRCda ay ka aruuriso wadahadalladan shaqsiga ah waxay u gudbisaa mas'uuliyiinta oo keliya marki ay ka hesho oggolaansho qofkii ay ka aruurisay.

Booqashooyinka waxay ku dhammadaan kulan dheeraad ah oo mar kale lala yeesho mas'uuliyiinta halkaas oo ICRCda si toos ah oo asturan uga hadleyso waxyaabihii uga soo baxay booqashadooda iyo daraasaddooda, waxayna mas'uuliyiinta siiyaan talooyin ku soo jeediya tallaabooyinka lagu hagaajin karo xaaladda ka taagan maxaabiista. Booqashooyin kale oo raad raac ah ayaa ka dib la sameyaa tasoo ay muhiim tahay in la qiimeeyo isbeddelka iyo saameynta ka dhalatay amaba la qiimeeyo baahida dheerida ah.

S: Sidee baad u hubsan kartaa qiimeyntaada? Mas'uuliyiinta miyay isku dayayaan in ay qariyaan dhibaatooyinka ama maxaabiista ay buunbuuniyaan dhibaatooyinka?

A: Hawsha xabsiyada waxa aasal u ah xiriir shaqsi oo kalsooni ah oo u dhexeya maxaabiista, qoysaska iyo mas'uuliyiinta. Sida xiriir kasta, arrintan way koreysaa wayna kobceysaa waqti markii laga soo wareego. Hase ahaate wax kasta lama sheegi karo ama daaha lagama qaadi karo isla hal mar. Xaggeena waqti ayey qaadataa si aan u ogaanno xaaladaha diiradana aan saarno arrimaha muhiimka ah. Booqashada lagu celceliyo waxay dhistaa kalsoonida waxayna kordhisaa qiimaha hawsheena. Waaya aragnimada aan ka dhaxalnay meelo kale waxay muujisay in dhammaan dhinacyada ay bilaabeen in ay si fiican isu fahmaan, waxisdhaafigana wuxuu noqonaaya mid furan.

S: Ma aragtaa wax isbeddel ah oo ka dhashay dhexgelintiinna?

J: Hawsha aan xabsiyada ka qabanno waa mid wejiyo kala duwan leh. Waxaan eegnaa dhammaan aragtiyaha ee ka mid ah xaaladaha iyo bii'ada ay ku sugan yihiin maxaabiista ha ahaato macaamil shakhsiyeed, ballanqaad garsoor, helitaan biyo, nadaafada, caafimaadka iyo nafaqada iyo sidoo kale laxiriika qoyska. Marka

saraakiisha takhaasusta leh ee ICRCda ay dayactirayaan ama hirgelinayaan hannaanka biyaha iyo nadaafada waxaad arki kartaa isbedel dhaqso ah dhinaca caafimaadka lahaystayaasha. Marka goobta caafimaadka ee xabisga daawo iyo alaab la keeno, durba ayaa wax isbeddel ah ku imanaya adeegga caafimaadka xagga helitaanka iyo tayada. Talooyinka iyo dardaarammada la siiyo mas'uuliyiinta xabsiyada iyo wadahadalo kuwo ka sareya ayaa kor u qaada awood dhisidda shaqaalaha xabsiga oo heero kala duwan jooga. Awood dhisidda waa hannaan muddo dheer soconeysa ayna qaadan karta sannooyin ama xitaa tobaneeyo sano iyadoo ku xirantahay dhibatooyinka ka socda nidaamo kala duwan ee maamulidda xabsiyada.

Haddi la eego waxyalaha qoysaska, mas'uuliyiinta iyo lahaystayaasha naftooda ay ka sheegayan hawlaha ICRCda ay ka qabato xabsiyada ee wadammo kala duwan ee caalamka oo dhan, hawlahan aad baa loo qiimeyaa oo loogu mahadceliyaa.

S: Maad caawisaan maxaabiista qoysaskooda?

J: ICRCda iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay adeegsadaan aalado kala duwan oo lacag la'aan ah si qoysaska loogu taageero in ay xiriir la yeeshaan qaraabadooda kala tagey. Adeeggaan waxaa kaloo loo fidiyaa shakhsiyaadka laga qaaday xorriyadooda kuna jira goobaha maxbuusnimada iyo qoysaskoodaba oo ku sugan gudaha iyo dibadda dalka.

Marka qof la xiro, mas'uuliyiinta waa in ay ku wargeliyaan qoyska. Taas waxaa u sii dheer, qoysaska waa in loo oggolaadaa in ay booqdaan qaraabadooda ee xiran. Marka booqashooyinka aan ay suurtagal aheyn sababtoo ah ammaanka ama dhaqaale la'aanta ama masaafada safarka, ICRCdu waxay la-haystayaasha iyo qoysaskoodaba gacan ku siisaa in ay isla wada xiriiraan iyadoo isticmaalayso Farriimaha Bisha Cas (RCM) iyo wicitaan telefoon oo gaaban loona yaqaan 'Salamat'.

S: Weli maad ka baqdeen in aad booqataan xabsiyada ku yaalla Soomaaliya? Khatar miyey noqon karaan?

J: Hawsheenna waxay ku saleysantahay isdhexgalka dadka in ay xaqiijiso sharafta la dhaqanka maxaabiista, marka qof kasta oo ka qeyb qaatana taasi uu fahmo, booqashooyinka ayaa sii fiican u dhaca. Dhab ahaan dadka qaarkooda mararka qaar kuma faraxsana booqashooyinkeena, waana jiri kartaa dareenxumo la fahmi karo oo ka timaada dhinacyada kala duwan oo ah lahaystayaasha iyo mas'uuliyiintaba. Hase yeeshee iskaashiga dhinacyadaasi waa qeyb ka mid ah dowrkeena ee muhiimsan oo aan ahayn wax khatar keena. Aragtida ugu cabsiga leh waa wixii dhici kara haddii hannaanka xabsiyada uusan helin taageerada ay u baahanyahay, gaar ahaan marka la eego hannaanka dhismaha. Nasiib darro arrintaan waa wax ka baxsan hawl-qabadka ICRCda laakinse waxaan isku dayeynaa in aan waxyaabahaan ka wargelinno hay'ado kale si ay ka qayb galaan.

S: Immisaa booqashooyin ayaa lagu waday gudaha Soomaaliya? Awood ma u leedihiin in aad booqataan dhammaan meelaha aad jeclaan lahaydeen in aad booqataan?

Sannadkii 2012 ICRCda waxay booqatay 16 jeer goobaha dadka lagu hayo. Tirada booqashooyinka noocan ah ayaa gaartay 45 sannadkii 2013kii wayna tiradooda sii gaartay 58 mudadii u dhaxeysay Jannaayo ilaa Septembar 2014. Hase yeeshe awoodda aan ku booqanno xad bay leedahay, laakinse waddanka oo idil baan ka hawlgalnaa iyo mas'uuliyiinta intooda badan baan la shaqeynaa. Runtii haddi la sheego waxaan jeclaan lahayn in aan in ka badan booqanno oo taageero iyo gargaar in ka badan aan fidinno. Waan hiigsigeynaa in aan booqanno dhammaan goobaha dadka lagu hayo iyadoon la fiirin noocyada maamulka ee mas'uul ka ah meelahaasi.

Sarkaal wakil ka ah ICRC oo maxabiista gacanta ka saaraya farriimo qoysaskooda ka socda

S: Maad booqataan 'xeryaha ku meel gaarka ah' oo ah goobaha dadka dagaallada joojiyey loo diro si loogu dhaqan celiyo?

J: Dhab ahaantii ma booqanno. ICRCdu waxay diirada ku saareysaa shakhsiyaadka laga qaaday xorriyadooda, xeryaha kor ku xusan looma aqoonsado goobo xiritaan. Waa jiraa xilli ay run ahaan ku xiran yihiin, xilligaas oo ah inta dadkaas aysan xeryahaan la geynin (waa marka koowaad ee dadka la soo qabto ama marka ay is dhiibaan). ICRCda waxay la shaqeysaa mas'uuliyiinta si loo horummariyo habka ladhaqanka maxaabiista ee sharafta leh xilliga xiritankooda. Marka shakhsiga loo gudbiyo xeraha ku meel gaarka ah, xaaladdooda ayaa isbeddesha oo noqota mid aan xiritaan ahayn.

Koox wakiil ka ah ICRC iyo Taliye Xabsi oo ka wadahadlaya arrimo la xiriira xabsiga

DHIBAATOOYINKA KA SOCDA MAAMULKA DARYEELKA CAAFIMAADKA EE LOOGU TALAGALAY DADKA XIRAN

Kooxaha ICRCda ee caafimadka ee xabsiyada ka shaqeya waa in ay ku taliyaan sidii loo horummari lahaa dhammaan nidaammada ee caafimaadka ee loogu talagalay dadka xabsiga ku jira. Kooxahaan ma baaraan noocyada cudurrada, mana daweyaan. Waajibkooda waxaa weye in ay shaqaalaha caafimmadka ee xabsiyada kula taliyaan daweynta guud ee cudurrada ama xanuunnada sida shuban, daacuun calooleed, qaaxo, beri beri, tiifow, cudurrada maqaarka (isnadaamis), cudurrada galmada laisku qaadsiiyo, HIV/AIDS iyo xanuunno kale oo faafa kuwaas oo ku tarma cimilada ama bii'ada xabsiga.

HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

In kastoo shakhsiyaadka xorriyadooda laga qaaday ay leeyihiin xaq in ay helaan daryeel caafimaad, waxay had iyo jeer la kulmaan dhibaatooyin badan, adeegganna uma heli karaan si la mid ah sidii ay u heli lahaayeen markay ku dhexjiraan bulshadooda. Haddii goob dadka lagu hayo aysan laheyn bar caafimaad oo shaqeysa ama aan joogin shaqaale caafimad, maxaabiista waxay badanaa ku tiirsadaan qoysaskooda si ay u helaan daawooyinka iyo lacagta daaweynta. Haddii takhaatiirtu aysan gaari karin maxaabiista, markaas lama daaweyn karo dadkaasi. Haddiina lahaystayaasha qoysaskooda aysan soo booqan karin, markaas ma heli karaan daryeel caafimaad oo habboon.

TAAGEERADA DHINACA GOOBAHA CAAFIMAADKA EE XABSIYADA

ICRCda waxay taageero joogta ah u fidisaa goobaha caafimaadka ee Xabsiyada Dhexe ee Muqdisho iyo Baydhabo, sidoo kale waxay bixisaa gargaar deg deg ah haddii loo baahdo. Tan iyo bishii Febraayo 2014 barta caafimaadka ee xabsiga Baydhabo waxay si joogto ah u heshaa taakulo xagga daawooyin, qalabyo caafimaad iyo tababbar. Kooxaha caafimadka ee ICRCda waxay goobta gudaheeda la shaqeeyaan shaqaalaha caafimaadka ee xabsiga. Si wadajir ah bay u fidiyaan lataasho caafimaad ah, taageero dhinaca maamulka farmashiyaha iyo daaweynta cudurrada ugu baahsan. Barnaamij la mid ah waxaa ICRCda ay ku taageertaa Xabsiga Dhexe ee Muqdisho si loo kordhiyo aqoonta shaqalaha xabsigaasi oona loo xoojiyo awooddooda ee daaweynta cudurrada iyo xanuunnada kala duwan ee maxaabiista.

Marka ay baahi jirto, ICRCda waxay xabsiyada u fududeysaa helitaanka daryeelka caafimaadka ee deg degga ah.

Bishii Abril 2014, ka dib markii Xabsiga Dhexe ee Muqdisho uu ka dillaacay shuban-biyood ba'an, ICRCda waxay

Sarkaal katinsan ICRC oo baarayo daawooyin Xabsiga Dhexe ee Mugolisho

taakulo ka geysaatay daawooyin muhiim ah iyo biyo nadiif ah, tasoo awood siisay in laga hortago faafinta cudurkaasi. Intaas waxaa u sii dheer, waxaa la dhisay dhowr goobood oo gacmaha lagu meydho, waxaana lagu taliyay oona lagu tababbaray habka maamulka nidaamka nadaafada ee maxaabiista.

MUHIIMADA NADAAFADDA GOOBAHA DADKA LAGU HAYO.

Shaqsi kasta oo xiran wuxuu u baahanyahay biyo ku filan uu cabo, ku mayrto, ku nadiifiyo hareerihiisa kuna weyso qaato. Marka biyo nadiif ah iyo saabuun si joogto ah loo isticmaalo taasi waxay ka hortagi kartaa cudurro farabadan oo faafa, gaar ahaan cudurrada maqaarka iyo shuban. Jikooyinka xabsiyada xitaa waxay u baahanyihiin biyo ku filan oo cuntada lagu diyaariyo alaabtana lagu dhaqo.

NIDAAMMADA BIYAHA IYO NADAAFADDA

Qiimeyn qoto dheer iyo wadahadallo lala yeeshay maxaabiista iyo maamulka xabsiga ka dib, saraakiisha ICRCda ee aqoonta leh waxay taageero ka geysan karaan goobaha dadka lagu hayo si ay u xannaaneeyaan ama u dayactiraan nidaammada biyaha iyo nadaafadda ee ka jira xabsiga. Tusaale ahaan saraakiisha ICRCda ee u qaabilsan Biyaha iyo Deegaanka waxay Xabsiga Dhexe ee Baydhabo ka hirgeliyeen shaqo dhismeed iyo dayactir si loo hagaajiyo kaabayaasha biyaha. Ugu horreyntii si loo kordhiyo tirada biyaha oo meesha ka jira, waxaa la dhisay haan biyaha lagu keydiyo oo sare u dhisan, ka dibna waxaa lagu xiriiriyey hababka biyaha xabsiga. Si loo hagaajiyo nadaafadda loona yarayo raaxa la'aanta maxaabiista, waxaa si buuxda loo dayactiray suuliyada iyo qeybta qubeyska. Ugu dambeyntii, ICRCda waxay dhistay madbakh cusub oo leh bii'o nadaafadeed oo cunto lagu diyaarin karo.

GUDDIGA FAYADHOWRKA

Arrinta muhimka ah ee hagaajinaya fayadhowrka goobaha dadka lagu hayo waa shaqaalaha xabsiga iyo awoodda lahaystayaasha ay ku maamulaan hannaanka fayadhowrka si loo joogteeyo biyo nadiif ah iyo bey'ad caafimaad leh. Si loo kormeero, loo maamulo lana ixtiraamo hannaanka, waxaa la aasaasay guddi fayadhowr ah oo ka kooban maxaabiis iyo shaqaale xabsiga si ay u fuliyaan mas'uuliyadda la wadaago. Qorshe wadashaqeyn ah ayaa la sameeyey si loo xaqiijiyo in dhammaan meelaha muhiimka ah sida suuliyada, meelaha lagu qubeysto, kushiimada iyo qolalka maxaabiista si joogto ah loo nadiifiyo. Qashinka adkaha ah kaas oo ah mid ka mid ah kuwa inta badan keena cudurrada ayaa si habboon loo maamula.

Marka la tababbaro ka dib, xubnaha guddiga waxay leeyihiin waajibaadka in ay maxaabiista siiyaan tababbar ku saabsan isticmaalka alaabta fayadhowrka iyo kiimikooyinka ay ICRCda ku taakuleeyeen xabsiga. Qol kasta waxaa loo magacaabay wakiil oo ku warbixiya dhibaatada nadaafadda/fayadhowrka marka ay dhacdo.



Warqad daabacan ee ICRCda ka isticmaashor Soomaliya si loo horumariyo Faya-dhowrka

TABABBAR XIRFADEED XABSIGA DHEXDIISA

Mashaariicda tababbar xirfadeedka ICRCda ay ka waddo xabsiyada asal bay u yihiin badbaadada, soo celinta sharafta iyo bulsho dib isudhexgelinta maxaabiista. Shaqada miradhalka ah waa udubdhexaadka isku kalsoonaanta shakhsiga waxayna wax ka geysataa caafimaad jireed iyo maskaxeed. Kala duwnaanshada iyo nooc nooca hawlaha maxaabiista ay ka fa'iideysan karaan ayaa u suurtageliya in ay ku sifoobaan xubno waxtar ku leh bulshada marka la sii daayo ayagoo la siiyey shaqo-xirfadeed oo gacan-ku qabad ah una suurtagelineysaa fursado shaqo oo badan.

ICRCda waxay sannadkii 2013 xabsiga Boosaaso ka hirgelisay mashaariic tababbar xirfadeed ah waxayna dhowreysa in hawlahaan ku fidiso meelo kale oo goobaha dadka lagu hayo ah. Waqtigaan la joogo 60 la-haystayaal oo isgu jira lab iyo dhedig ayaa lagu diiwaangeliyey tababar xirfadeed lagu baranaayo alwaax qoridda, sameynta alaab guri/xafiis, fuundi iyo xirfadaha dhar tolida.

SHAQO BARASHO XABSIGA GUDIHIISA

Magacaygu waa 'Xaajiyow Maxammed'. Asal ahaan waxaan ka soo jeedaa Mudug halkaas oo xaaskeyga iyo labadeyda wiil oo da'yar ay ku noolyihiin. Xabsigaan waxaan ku xiranahay muddo 2 sano.

Sannadkii 2012 ayaa markii ugu horreysay xabsiga ku arkay kooxda ICRCda. Waxay yimaadeen in ay booqdaan qolalka xabsiga oona wadahadlaan lahaystayaasha kana hadlaan nolol maalmeedkeena, xaaladaheena iyo caafimaadkeena. Alaabta fayadhowrka loogu talagalay oo ICRCda qeybisay waxaa ka mid ahaa saabuun, baaldiyo iyo walxaha wax lagu nadiifiyo. Sidoo kale maxaabiistii aan awood u lahayn in ay akhbaaro ka helaan reerahooda sida aniga oo kale, waxaa ergada ICRCda ay naga caawisay in na soo gaarsiiso farriimo. Alaabta ICRCda na siisay waxay muuqaan karaan wax yar laakinse dad badan noloshooda ayay beddeli karaan. Sannad ka dib waxaan maqlay in ICRCda iyadoo wadashaqeyn ka heleen maamulka xabsiga ay rabaan in lahaystayaasha u bilaabaan tababbar xirfadeed. Markii hore ma aanan rumeysan. Yaa daneynaya in lahaystayaal la tababbaro?

Deegaankeyga gudihiis abid ma aanan ka helin fursad tababbar shaqo oo ka baxsan isticmaalka hubka. Sidaas darteed waxaan noqday askari ka dib waxaa la igu daray kuwa ilaaliya ammaanka shaqsiyaadka muhiimka ah.

ICRCda iyo maamulka xabsiga baan ku mahadcelinayaa in ay igu dareen tababbarka nijaarnimada. Kuwo kalena waxay baranayaan fuundinimo ama

Maxamed (direys cas) oo baranaya habka loo sameeyo alaabta guriga iyo xafiisyada

Tababbarka tolidda dharka ee laga wado qaybta dumarka

dawaarlenimo. Weli way igu adkeyd in aan rumeysto in xabsiga dhexdiisa hawl ka heleyno. Tababbar wuxuu u baahanyahay goob, alaab, tababarayaal leh dhiiringelinyo badan si hore ugu riixaan mashruuca.

NOLOSHA XABSIGA KA DIB

Lix bilood ka hor ayaan bilaabay, maanta waxaan awoodaa in wax badan gacmaheyga ku sameeyo. Fiiri, tusaale ahaan miiskaan iyo kursigaan dhammaantooda anigaa sameeyey. Waa hubin kartaa, waa isticmaali kartaa, waa kaamil. Alwaax waxaan kaa sameyn karaa wax kasta gurigaaga u rabto.

Xirfadaasi waxay gebi ahaan bedeshay nolosheyda, waxay xitaa hagaaajisay caafimaadkeyga xabsiga dhexdiisa. Hore waqtigoo dhan waan bukay anigoo aan laheyn awood ku dhaqdhaqaaqo. Hada waxaa igu buuxa himmo shaqo. Qof cusub oo shaqo cusub yaqaan ayaan ahay. Mustaqbalka marka xorriyadeyda aan helo waxaan qorsheynayaa in aan ka shaqeysto hoosooyinka lagu qoro alwaaxda. Maalgelin yar ayaan ku qorsheyn karaa hawl ii gaar ah si aan u madaxbannaanado. Waxaan xitaa fidinaaya casharadii xabsiga ku bartay anigoo baraya wiilasheyda sifo si tobankooda farood ay si habboon ugu sameeyaan waxyaalo lagu ciyaaro iyo boonbalo ka sameysan alwaax.

ICRC
Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas

ICRC Somalia Delegation
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi - Kenya
www.icrc.org
© ICRC, March 2015

All Photos: Pedram Yazdi/ICRC

WAAJIBAAD SHAQO

ee Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas (ICRC) waa urur aan eexan, madaxbanaan dhex dhexaadna ah kaasoo howshiisa aadaninimo kaliya tahay inuu dhowro nolasha iyo sharafta dhibanayaasha dagaalada iyo xaaladaha kale ee qalalaase iyo inuu siiyo gargaar dhibanayaasha collaadaha. ICRC-da waxay kaloo ku dadaashaa inay ka hortagto dhibaatada iyadoo horumarinaysa xoojinaysana xeerka aadaninimada iyo mabaadiida caalamiga ee aadaninimada. Iyadoo la aasaasay sanadkii 1863dii, ICRC-du waa asalka Axdiyada Jeneefa iyo Dhaqdhaqaaqa Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas. Waxay jihaysaa ayna isku dubaridaa howlaha caalamiga ah oo ay qabato Dhaqdhaqaaqa xiliyada colaadaha iyo xaaladaha kale ee qalalaasaha.

2015 0038/002 03.2015 3000